Gobolada Minnesota iyo Wisconsin, dukumintigaan waxaa loogu yeeraa dardaaranka daryeelka caafimaadka. Dhexdiisa ayaad ku qori kartaa waxa aad dooneysid iyo go'aannada ku saabsan daryeelka caafimaadkaaga iyo inaad qof u magacawdo inuu kuu gaaro go'aannada daryeelka caafimaadka marka aad awoodi weyso ama aad doorato inaad go'aan gaarin.

Tusaale ahaan, hadii aad koomo gasho ma kari kartid inaad go'aan ka gaartid waxa aad dooneyso in laga yeelo daaweynta daryeelka caafimaadkaaga.

Wixii ka horeeyay sanadkii 1998 waxaa jiray Minnesota tiro dukumenti daryeel caafimaad ah. Waxaa ka mid ahaa dardaaranka qofka nool, awood raagta oo qareen ee daryeel caafimaad iyo caddeymaha caafimaadka dhimirka (oo loo yaqaano dardaraan hore ee dhimirka).

Si dadka loogu fududeeyo si ay u sameystaan dardaraan, dardaaranka qofka nool iyo awood raagta oo qareen ee daryeel caafimaad, golaha sharci dejinta waxay isugu geeyeen hal meel oo ah dardaraan daryeel caafimaad sanadku markuu ahaa 1998. Caddeynta caafimaadka dhimirka waxuu ahaanayaa dukuminti gaar ah.

## **Dardaaranka Hore**

Kani waa eray ballaaran oo loola jeedo tilmaamo qof yiraahdo ama qoro oo ku jeeda daryeel bixiyayaasha caafimaadka kuna saabsan rabitaanka daryeelka caafimaadkiisa iyo go'aamadiisa.

## **Dardaraan Qofka Nool**

kaliya haddii xanuun aadan ka soo kabaneyn kugu dhaco. Waad ku caddeyn kartaa nooca daaweeyn eed dooneyso xaaladaha qaarkood.

Uma magacaaban kartid qof inuu go'aamo kuu gaaro (waxaa loogu yeeraa wakiil) dardaaranka qofka nool. Foomka dardaaranka qofka nool ee la fuliyay wixii ka horeeyay sanadkii 1998 waa ansax.

## **Durable Health Care Power of Attorney**

This is a type of health care directive used before 1998. It states whom you have chosen to make health care decisions for you if you are unable to do so yourself.

This directive is for health care decisions only; it does not include legal or financial decisions. Durable health care power of attorney forms legally executed before 1998 are valid.

## **POLST (Provider Orders for Life-sustaining Treatment)**

A POLST is for anyone who:

- might die in the next 12 months
- has a serious illness
- cannot make decisions
- does not want CPR.

Your doctor can use the POLST form to document your wishes in a clearly written medical order.

One decision you can make is whether or not you want CPR if your heart or breathing stops. This is known as a “do not resuscitate” order.

## **Awood Raagta oo Qareen ee Daryeel Caafimaad**

Kani waa nooc dardaaran daryeel caafimaad oo la isticmaali jiray wixii ka horeeyay sanadkii 1998. Waxa ku qoran qofka aad adigu u wakiilatay inuu kuu gaaro go'aamada daryeelka caafimaadka haddii aad awoodi weyso inaad adigu isu gaarto.

Dardaaran kani waa go'aamada daryeelka caafimaadka oo kaliya; kuma jiraan go'aamada xaga sharciga ama dhaqaalaha. Foomamka awood raagta oo qareen ee daryeel caafimaad ee si sharci ah loo fuliyay wixii ka horeeyay sanadkii 1998 waa ansax.

## **Dalabka Daryeel Bixiyaha ee Daaweynta Nolol-Joogteyn**

POLST waa xuruuf la soo gaabiyay oo luqada ingiriisiga ah oo macnaheedu yahay ( dalabka daryeel bixiye ee daaweyn nolol-joogtain) waa qof kasta oo:

- laga yaabo inuu dhinto 12ka bilood ee soo socda
- qaba cudur qatar ah
- aan go'aano gaari karin
- aan dooneyn in lagu sameeyo CPR.

Dhaqtarkaagu wuxuu isticmaali karaa foomka POLST si loo qoro waxa aad dooneysid dalab caafimaad oo si cad u qoran.

Hal go'aan oo aad qaadan karto waa inaad dooneyso ama aanad dooneyn in lagugu sameeyo CPR haddi wadnahaaga ama neefsashadaadu joogsato. Tan waxaa loo yaqaan “dib ha ii soo kicin” dalab.

## **Do Not Resuscitate (DNR)**

This is a type of care planning decision. It is your request not to receive CPR (cardiopulmonary resuscitation) if your heart stops or if you quit breathing. If you have this type of request, a DNR order is put into your medical record by your doctor.

Unless you indicate otherwise, health care providers will assume you do want CPR and it will be provided if needed.

## **To Get a Health Care Directive Form**

Ask your health care provider or go to [allinahealth.org/acp](http://allinahealth.org/acp) to find a form.

## **Dib Ha li Soo Kicin**

Kani waa nooc ka mid ah go'aamada qorsheynta daryeelka . Waa codsigaaga ah inaan dib lagu soo kicin (dib u soo kicinta wadnaha iyo sambabada) haddii wadnahaagu shaqada joojiyo ama haddii aad neefsan weysid. Haddii aad haysatid dalabka noocan ah, dhaqtarkaaga ayaa galinaya keydka caafimaadkaaga, amar ah dib ha ii soo kicin oo luqada ingiriiska loo soo gaabiyo DNR.

Haddii aadan si kale u tilmaamin, daryeel bixiyayaasha caafimaadka waxay u qaadan doonaan inaad dooneysid in CPR lagugu sameeyo, waana lagugu sameynayaa haddii aad u baahatid.

## **Si aad U Hesho Foomka Dardaaranka Daryeelka Caafimaadka**

Ka codso daryeel bixiyahaaga caafimaadka ama gal [allinahealth.org/acp](http://allinahealth.org/acp) si aad u heshid foomkan.



## Your Rights and Responsibilities as a Patient

You have certain rights and responsibilities as a patient in a Minnesota hospital. These rights and responsibilities help you take an active role in your health care and promote your well-being and recovery.

### Your Rights

You have a right to:

- receive medical and personal care that is:
  - courteous and respectful
  - based upon your specific needs
- know the name of the doctor or other health care provider who is responsible for coordinating your care
- have complete and current information about your treatment so you can make informed decisions; this includes:
  - knowing the diagnosis, treatment, alternatives, risks and most likely results
  - having the information stated in terms and words you understand
  - having a family member or other chosen person present when you talk with your health care provider if you wish

## Xuquuqdaada iyo Waajibaadkaaga Bukaani Ahaan

Waxad leedahay xuquuq iyo waajibaad gaar ah marka ad tahay bukaan ku jira cusbitaal ku yaalla Minnesota. Xuquuqdaa iyo waajibaadkaasi waxay kaa gargaari doonaan inad si firfircoon uga qaybgashid daryeelka caafimaadkaaga hormarisidna caafimaadkaaga iyo bogsashadaada.

### Xuquuqdaada

Waxad xaq u leedahay:

- inad heshid daryeel caafimaad iyo mid shakhsi oo ah:
  - mid qadarin iyo ixtiraam leh
  - mid ku salaysan baahidaada gaarka ah
- inad ogaatid magaca dhakhtarka iyo shaqaalaha kale ee caafimaad ee masuulka ka ah daryeelkaaga
- inad heshid war buuxa oo cusub oo ku saabsan daweyntaada si ad u gaadhi kartid go'aamo warhayn ku dhisan; waxa taa ku jira:
  - inad ogaatid cudurka lagaa helay, daweynta, wixii badali kara daweynta, halista ama ciladaha dawada iyo wixii natiijo ka soo bixi kara
  - inad heshid war ku qoran ereyo iyo hadal ad fahmi kartid
  - inu qof qoyskaaga ka tirsan ama qof kaloo ad dooratay kula joogo marka ad la hadlaysid dhakhtarka ama shaqaalaha caafimaadka haddii ad doonaysid

(over)

- see a copy of your medical records as allowed by law
- be cared for with reasonable regularity and continuity of staff (as allowed by facility policy)
- know what services are available at the facility
- quick and reasonable response to your questions and requests
- join in discussions about your care or treatment; this includes:
  - being able to discuss treatments and alternatives
  - being able to attend formal care conferences
  - having a family member or other chosen person with you if you feel more comfortable that way
  - having a family member or other chosen person speak for you if you cannot do so yourself unless you have stated otherwise in writing
- refuse care
- be free from restraints that are not medically necessary and be free from abusive or harassing behavior
- have privacy for medical and personal care; this includes:
  - discussions, exams, treatments medical records (except where a release of records is authorized by law)
  - personal hygiene activities
- have personal privacy with respect to your preferences (such as cultural, social or religious preferences) and for communications with others (such as phone calls or mail)

- inad aragtid nuqulka ama koobiyada diiwaankaaga ama faylkaaga caafimaadka sida u sharcigu ogol yahay
- in lagu siiyo daryeel joogto ah oo leh shaqaale joogto ah intii caqli-gal ah (hadba sida taasi u waaqafsan tahay xeerka goobta)
- inad ogaatid waxa ay yihiin adeegyada laga heli karo goobta
- in su'aalahaaga iyo codsiyadaada laga bixiyo jawaab dhakhso ah oo caqli-gal ah
- inad ka qaybgashid wada-hadalada ku saabsan daryeelkaaga ama daweyntaada; waxa taa ku jira:
  - inad awoodi kartid inad ka hadashid daweynta iyo wixii badali kara
  - inad awoodi kartid inad ka soo qaybgashid shirarka rasmiga ah ee daryeelka
  - inu qof qoyskaaga ka tirsan ama qofkii kale ee ad dooratay kula joogo haddii ad sidaa ku kalsoon tahay
  - inu qof qoyskaaga ka tirsan ama qofkii kale ee ad dooratay kuu hadlo haddii aanad adigu naftaada u hadli karin haddii aanad si kale ku muujin qoraal
- inad diidid daryeel
- inad ka badbaadid xidhxidhid aan caafimaad ahaan lagama-maarmaan ahayn inad ka badbaadid dhaqan xumeyn ama dhibis ah
- inad asturnaan u heshid daryeelka caafimaadka iyo shakhsigaba; waxa taa ku jira;
  - wada-hadalka, baadhitaanada, iyo daweynta diiwaanka ama faylasha caafimaadka (marka laga reebo bixinta diiwaanka ama faylka u soo amray sharcigu)
  - hawlaha sixada shakhsiga
- inad asturnaan u heshid wixii ad gaar u jeceshahay (sida wixii ah dhaqan, bulsho ama diin) iyo isgaadhsiinta dadka ad la yeelanaysid (sida wicitaanada tilifoonka ama waraaqaha boosta)

- have an interpreter provided with no charge
- make a formal grievance and recommend changes in the facility's policies or services without fear of revenge or punishment.

## Your Responsibilities

You are responsible for:

- showing respect and consideration for the facility staff and property
- providing accurate and complete information about your health and reporting any changes in it
- asking questions when you do not understand what you have been told about the care being offered to you or what you are being asked to do
- following the care or treatment plan developed with you
- reporting any risks you think are related to your care as well as any unexpected changes in your condition
- accepting the consequences if you don't follow the care or treatment plan
- paying for charges related to your care.

## For More Information

This brochure contains only a brief summary of your rights and responsibilities. If you would like more information:

- please see the copy of the Minnesota Patients' Bill of Rights you received or
- contact the Minnesota Department of Health:
  - Office of Health Facility Complaints, P.O. Box 64970, St. Paul, MN 55164-0970
  - 651-201-4201 or 1-800-369-7994.

- in lagu siiyo turjubaan aan lacagi kaaga bixin.
- inad sameysid cabasho rasmi ah oo aad ku talisid in isbadalo lagu sameeyo xeerarka ama adeegyada goobta adiga oo aan ka biqin aar-goosasho ama aarsi ama ciqaab.

## Waajibaadkaaga

Waxa waajibaadkaagu yahay:

- inad shaqaalaha goobta caafimaadka iyo mulkigaba u muujisid ixtiraam iyo qadarin
- inad bixisid war buuxa oo sax ah oo ku saabsan caafimaadkaaga soona sheegtid wixii isbadal ku dhaca
- inad su'aalo dadka weydiisid haddii aanad fahmin wixii lagaaga sheegay daryeelka lagu soo bandhigay ama waxa lagaa filayo inad samaysid
- inad raacdid daryeelka ama qorshaha daweynta ee la soo saaray adigoo og
- inad soo sheegtid wixii ah halis ee ad u maleynaysid inay la xidhiidhaan daryeelkaaga iyo waliba wixii ah isbadalo aan la filaynin ee ku dhacay xaaladaada
- inad ogalaatid wixii ka yimaada haddii aanad raacin daryeelka ama qorshaha daweynta
- inad bixisid kharashka la xidhiidha daryeelkaaga.

## Wixii war dheeraad ah

Qoraalkan yar waxa ku yaala kaliya koobis gaaban oo ku saabsan xuquuqdaada iyo waajibaadkaaga. Haddii ad doonaysid war dheeraad ah:

- fadlan eeg nuqulka ama koobiga Xeerka Xuquuqda Bukaanka Minnesota ee aad heshay ama
- la soo xidhiidh: Minnesota Department of Health
  - Office of Health Facility complaints P.O. Box 64970 St. Paul, MN 55164-0970
  - 651-201-4201 ama 1-800-369-7994



## For Concerns About Your Care

Talk with your health care provider if you have any concerns about your care. You can also talk with one of the hospital's patient care liaisons.

If you think that your concerns have not been satisfactorily resolved, you may contact The Joint Commission:

- phone:  
1-800-994-6610
- email:  
complaint@jointcommission.org
- address:  
Office of Quality Monitoring  
The Joint Commission  
One Renaissance Boulevard  
Oakbrook Terrace, IL 60181.

## Wixii ah Su'aalo ku Saabsan Daryeelkaaga

La hadal daryeel caafimaad bixiyahaaga haddii aad qabtid su'aalo ku saabsan daryeelkaaga. Waxaad kaloo la hadli kartaa mid ka mid ah xiriiriyayaasha daryeelka bukaanka ee isbitaalka.

Haddii aad u maleynaysid in walaacaaga aan si aad ku qanacday loo xalin, waxa aad la xidhiidhi kartaa Guddida Wada-jirka ah (Joint Commission):

- teleefon:  
1-800-994-6610
- iimayl:  
complaint@jointcommission.org
- adrees:  
Office of Quality Monitoring  
The Joint Commission  
One Renaissance Boulevard  
Oakbrook Terrace, IL 60181.

## **Xaquuqahaaga iyo Dhowritaanadaada ka dhanka ah Kharashaadka Caafimaadka ee Filasho la'aanta ah**

Marka aad hesho daryeel degdeg ah ama uu ku daaweeyo dakhtar aan ka tirsanayn shabakada isbitaalka ama xarunta daryeelka casriga ah, waxaa lagaa dhowrayaa kharashaadka aan la fileyn ama kharashaadka baaqiga soo hadha.

### **Waa maxay "kharashaadka baaqiga soo hadha" (oo mararka qaar loo yaqaan "kharashaadka filasho la'aanta ku yimaada")?**

Marka aad la kulanto dakhtar ama adeeg bixiye caafimaad oo kale, waxaa laga yaabaa in lagugu yeesho kharash aad jeebkaaga ka bixinayso, sida caymiska go'an, qoondada caymiska ee aad bixineyso, iyo/ama lacagta lagaa jaro. Waxaaa lagugu yeelan karaa kharashaad kale ama waxaa lagaa rabi karaa inaad bixiso guud ahaan kharashaadka haddii aad la kulanto dakhtar ama xarun qaabilsan daryeelka caafimaadka oo aan ka tirsanayn shabakada qorshaha caymiskaaga.

"Shabakada ka baxsan caymiska" waxaa lagu qeexaa dakhdaatiirta iyo xarumaha aan heshiis la gelin shirkada bixinaysa qorshaha caymiskaaga. Adeeg bixiyaasha shabakada ka baxsan waxaa loo oggolaan karaa inay ugu soo dalacaan kharashaadka dhaafsiisan inta caymiskaaga bixinaayo iyo kharashaadka guud ee ku baxaaya adeegaaga. Arrintaan waxaa loo yaqaan "**Kharashka baaqiga soo hadha.**" Lacagtaan waxay u badan tahay inay ka badan tahay kharashaadka isla adeegaan ay ku bixiyaan xarumaha shabakada kamidka ah waxaana laga yaabaa inaan lagu xisaabin xadidka kharashaadka aad jeebkaaga ka bixiso sanadkii.

"Kharashaadka filasho la'aanta ah" waa kharashaad baaqiga soo hadha oo aan la filayn. Arrintaan waxay timaadaa marka aadan xakameyn karin cida ka qaybqaadanaysa daryeelkaaga—sida marka aad la kulanto xaalad degdeg ah ama marka aad balan ka qabsato xarun shabakada katirsan laakiin si filasho la'aan ah uu kuu daaweeyo dakhtar aan ka tirsanayn shabada.

### **Waxaa lagaa ilaalinayaa kharashaadka baaqiga soo hadha ah ee aad ku bixineyso:**

#### **Adeegyada xaaladaha degdega ah**

Haddii aad qabto xaalad caafimaad oo degdeg ah aadna adeegyada xaaladaha degdeg ah ka hesho dakhtar aan ka tirsanayn shabakada ama xarunta, dakhtarka ama xarunta waxaa laga yaabaa inta badan inay kugu soo dalacaan kharashka qorshaha caymiskaaga ee aad ku bixiso shabada kamidka ah caymiska (sida kharashka caymiska go'an iyo qoondada caymiska ee aad bixineyso). Wax **lacagta** baaqiga soo hadha lagaagama qaadi karo adeegyadaan xaaladaha degdega ah. Kani waxaa kujira adeegyada laga yaabo inaad hesho kadib marka xaaladaadu hagaagto, illaa inaad bixiso maahee oggolaansho qoraal ah aadna ka tanaasusho dhowritaanadaada kaa ilaalinaayo in lagugu soo dalaco kharashka kabida ah ee la xariira adeegyadaan xaaladaha degdega ah.

Bixiyaha daladu waxaa ka mamnuuc ah inuu ku dalaco lacagta cida ku jirto wixii ka badan inta ay ogoshahay shirkada caymisku ee heshiiska kula jirta bixiyaha wadarta lacagta adeega daryeelka caafimaadka. Bixiyaha dalada waxaa loo ogol yahay inuu kharashka ku dalaco cida ku jirta wixii wada bixin, ka jarid, ama caymis wadareed ah ee la ansixiyay.

Bixiyaha dalada ku jira waxaa loo ogol yahay inuu kharashka ku dalaco cida ku jirta adeegyada uu siiyay ee caymiska caafimaadka qofku aanu bixinaynin ilaa inta uu qofku ku ogolaaday qoraan ahaan kahor adeega inta aan la qaban inuu bixiyo wixii adeeg ah ee aanu caymisku bixin.

**Qayb kamid ah adeegyada isbitaalka ama xarunta daryeelka casriga ah ee katirsan shabakada caymiska**

Marka aad adeegyo ka hesho isbitaalka ama xarunta daryeelka casriga ah ee katirsan shabakada caymiska, qaar kamid ah adeeg bixiyaasha ayaa laga yaabaa inaysan ka tirsanayn shabakada caymiska. Marxaladahaan, Inta badan adeeg bixiyaashaas waxay ku dulsaari karaan kharashaadka cadadka qorshahaaga shabakada kamidka ah caymiska. Arrintaan waxaa kamid ah daawooyinka xaaladaha degdeg ah, suuxdinta, unugtada baaritaanka lagu sameeyo, shuucaaca, shaybaadhka, adeegyada daryeelka ilmaha yaryarka ah, gacan yaraha dakhtarka qaliinka, dakhtarka ama adeegyada dakhtarka daryeel bixiyaha ah. Adeeg bixiyaashaas **kuguma** soo dalici karaan kharashka baaqiga soo hadha mana **ku** waydiin karaan inaad ka kaaftoonto dhowritaankaaga ku aadan inaan lagugu soo dalicin kharashka baaqiga ah.

Haddii aad adeegyo kale ka hesho xarumahaan shabakada caymiska katirsan, adeeg bixiyaasha aan ka tirsanayn shabakada caymiska kuguma **soo** dalici karaan kharashaad baaqiga soo hadhay, illaa inaad bixiso maahee oggolaansho qoran aadna ka kaaftoonto dhowritaankaaga.

**Marna lagaama doonaayo inaad joojiso dhowritaanka ee ku aadan kharashka baaqiga soo hadhay. Sidoo kale lagaama doonaayo inaad daryeel ka hesho xarun aan ka tirsanayn shabakada caymiska. Waxaad adeeg bixiye ama xarun ka dooran kartaa nidaamka qorshaha caymiskaaga.**

Bixiyaha daladu waxaa ka mamnuuc ah inuu ku dalaco lacagta cida ku jirto wixii ka badan inta ay ogoshahay shirkada caymisku ee heshiiska kula jirta bixiyaha wadarta lacagta adeega daryeelka caafimaadka. Bixiyaha dalada waxaa loo ogol yahay inuu kharashka ku dalaco cida ku jirta wixii wada bixin, ka jarid, ama caymis wadareed ah ee la ansixiyay.

Bixiyaha dalada ku jira waxaa loo ogol yahay inuu kharashka ku dalaco cida ku jirta adeegyada uu siiyay ee caymiska caafimaadka qofku aanu bixinaynin ilaa inta uu qofku ku ogolaaday qoraan ahaan kahor adeega inta aan la qaban inuu bixiyo wixii adeeg ah ee aanu caymisku bixin.

**Marka aan la oggolayn kharashka baaqiga ah, waxaad sidoo kale haysataa dhowritaanaadan soo socda:**

- Waxaad masuul ka tahay oo kaliya qeybta lacagta kugu soo aadaysa (sida caymiska go'an, qiimaha caymiska ee aad bixiso, iyo lacagaha lagaa jaro ee aad bixin lahayd haddii adeeg bixiyaha ama xaruntu katirsan tahay shabakada caymiska). Qorshahaaga caafimaadka ayaa si toos ah kharashka u siinayaa adeeg bixiyaasha iyo xarumaha aan katirsanayn shababada caymiska.
- Guud ahaan qorshahaaga caymiska waa inuu:
  - Daboolaa adeegyada xaaladaha degdeg ah adigoo u baahnayn inaad oggolaansho hore u hesho adeegyada (oggolaanshaha hordhaca ah).
  - Daboolaa adeegyada xaaladaha degdeg ah ee ay bixiyaan adeeg bixiyaasha aan katirsanayn shabakada caymiska.
  - Ku saleeyaa lacagta ay kugu yeeshaan adeeg bixiyaha ama xarunta (kharashka la

wadaago) lacagta la siin lahaa adeeg bixiyaha ama xarunta katirsan shabakada caymiska waana in kharashkaas lagu muujiyo sharaxaadaada gunnooyinka.

- Xisaabiyaa kharashaad kasta ood ku bixiso adeegyada xaaladaha degdega ah ama adeegyada shabakada aan ka tirsanayn qorshaha caymiska lana xariira lacagta lagaa jaro iyo xadidka lacagta aad jeebka ka bixiso.

**Hadii si khalad ah laguugu soo dalacay kharashka**, waxaad la xidhiidhi kartaa oo aad booqan kartaa <https://www.cms.gov/nosurprises> si aad u hesho xog dheeraad ah oo ku saabsan xaquuqahaaga ku xusan sharciga federaalka.





## Ogeysiiska Habdhaqannada Asturnaanta

### OGEYSIISKANI WUXU SHARAXAYAA SIDA MACLUUMAAD CAAFIMAAD OO KUGU SAABSAN LOO ISTICMAALI KARO EE LOO BIXIN KARO IYO SIDA AD U HELI KARTID MACLUUMAADKAAS. FADLAN SI TAXADIR LEH U AKHRI.

Sababta oo ah waxa aanu daryeelnaa caafimaadkaaga, waxa aanu wax ka ogaanaa naftaada. Waxyaabaha aanu ogaano qaar ka mid ah waxay galaan diiwaanka ama faylka caafimaadkaaga, gaar kalena waxay galaan faylka biilasha. Si loo badbaadiyo asturnaantaada, hay'adayadu waxay raacda xeerar la yaqaano oo ku saabsan sida loo maamulo macluumaadka caafimaadkaaga. Xeerarkaas iyo xuquuqdaada macluumaadka caafimaadka waxa lagu soo koobay Ogeysiiskan Habdhaqannada Asturnaanta ("Ogeysiiska"). "Macluumaadka Caafimaadka" macnihiisu waxa weeye macluumaad hadda ah ama mar hore oo ku saabsan heerka caafimaadkaaga, xaaladdaada, cilad-sheegid, daweyn, saadaalin, ama lacag-bixinta daryeelka caafimaadka. (Waxa jira dhawr ka-reebitaan.)

#### Waajibaadkayaga Macluumaadka Caafimaadka

- Waxa nagu waajib ah in aanu ilaalino asturnaanta macluumaadka caafimaadkaaga iyo in aanu ku siino Ogeysiiskan.
- Waxa nagu waajib ah in aanu raacno qodobadayada Ogeysiiska Habdhaqannada Asturnaanta ee imminka jira.
- Waxa aanu adeeci doonaa qodobada Ogeysiiskan. Waxa noo dhawrsan xaq in isbeddelo lagu sameeyo Ogeysiiskan taasoo ah sida u oggol yahay sharcigu. Waxa noo dhawrsan xaq in aanu sameyno qodobo Ogeysiis oo cusub oo saameynaya dhammaan macluumaadka caafimaadka ee aanu hadda hayno, iyo wixii ah macluumaad caafimaad ee aanu helno mustaqbalka. Haddii aanu isbeddelo maadi ah ama muhiim ah ku sameyno habdhaqannadayada asturnaanta, waxa aanu isla markiiba naqtiimi doonaa Ogeysiiskayaga. Nuqul kasta oo ah Ogeysiiskan waxa u lahaan doonaa taariikh hirgalid oo ku qoran. Haddii aanu beddelno ogeysiiskan, waxad Ogeysiiska la naqtiimay ka heli kartaa bartayada internetka oo ah [allinahealth.org](http://allinahealth.org).

#### Ayaa Raaci Doona Ogeysiiskan

Ogeysiiskani wuxu sharaxayaa habdhaqannada Allina Health iyo:

- dhammaan qaybaha iyo unugyada Daryeel-bixiyeyaasha Allina Health
- dhammaan dhakhaatiirta tababarka ku jirta, ardayda caafimaadka iyo la-tababareyaasha kale ee xidhiidh la leh Allina Health
- dhammaan tabaruceyaasha laga yaabo inay ku gargaaraan inta ad adeegyo ka helaysid Allina Health
- dhammaan shaqaalaha joogtada ah, iyo shaqaalaha kale ee Allina Health iyo
- Bixiyeyaasha daryeel caafimaadka ee madax-banaan ee daryeel siiya bukaanka jooga goobaha Allina Health (sida dhakhaatiirta, gargaareyaasha dhakhaatiirta, cilaaj-yahannada, iyo bixiyeyaasha daryeel caafimaad ee

kale ee aan shaqaale joogto ah u ahayn Allina Health), iyada oo bixiyeyaasha daryeel caafimaad ee kale ay ku siiyaan ogeysiis habdhaqan aturnaan oo u gaar ah oo sharaxaya sida ay u ilaalin doonaa macluumaadkaaga caafimaadka mooyaane.

### Xuquuqdaada Macluumaadka Caafimaadka

**Xad-u-yeelista Isticmaalka ama Bixinta.** Ogeysiiskani wuxu sharaxayaa dhawr xad-u-yeelis oo ku saabsan sida aanu u isticmaali karno una bixin karno macluumaadka caafimaadkaaga. Waxa ad naga codsan kartaa xad-u-yeelis dheeraad ah oo ku saabsan sida aanu u isticmaalno ama cidda aanu siino macluumaadka. Waa inad codsiga xad-u-yeelista ka soo dhigtid qoraal. Haddii ad naga codsatid in war ku saabsan adeeg aan loo dirrin shirkadda caymiskaaga (inshuurankaaga) ee ad adigu kharashka oo dhan bixiso waanu yeeleyna codsigaaga ku saabsan xad-u-yeelista. Haddii ad naga xadeysid in aanu macluumaadkaaga siiyo caymiskaaga, waxa kale oo ad u baahan doontaa inad sharaxdid sida ad u bixin doontid kharashka biilasha. Qasab naguma ah in aannu oggalaano codsiyadaada kale. Haddiise aanu oggalaano, waannu raaci doonaa xad-u-yeelista marka laga reebo:

- xaalad degdeg ah oo keenaysa in macluumaadkaaga loo baahdo si lagu daweeyo
- haddii ad na siisid oggalaansho qoran oo noo fasaxaya in aannu isticmaalno ama bixino macluumaadkaaga
- haddii ad go'aan ku gaadhid ama annagu go'aan ku gaadhid in la joojiyo xad-u-yeelista, ama
- sidii kale ee u sharcigu farayo.

**Isgaadhsiin Beddel ah.** Caadi ahaan, waxa aanu kaala soo xidhiidhi doonaa adreeska iyo lambarka teleefonka ee ad na siisid. Waxa ad na weydiisan kartaa inaan kuula soo xidhiidhno siyaabo kale ama kaala soo xidhiidhno goob kale. Waanu oggalaan doonaa codsigaaga haddii u yahay caqli-gal.

**Helista Macluumaadka ee Bukaanka.** Waxa ad naga codsan kartaa inad fiirisid ama koobi (nuqul) ka heshid macluumaadka caafimaadkaaga. Haddii ad naga codsatid nuqul ah macluumaadka caafimaadkaaga ee aanu si elegtaroonig ah ama kombiyuutar ah u hayno waxa aanu kugu siin doonaa qaab elegtaroonig marka ad codsatid. Waxa laga yaabaa in aanu kugu soo dalacno kharash sida u oggol yahay sharcigu si looga soo baxo codsigaaga. Badi bukaanku way fiirin karaan oo koobi ka heli karaan diiwaanka caafimaad oo dhammeystiran. Marmar dhif ah, waxa laga yaabaa in aanu diidno codsi in la fiiriyo oo la helo koobi ah macluumaadka qaarkood ee ku jira diiwaanka caafimaadka. Tusaale ahaan, waxa laga yaabaa in tani dhacdo haddii, iyada oo sida u sheegayo ra'yiga xirfad leh ee dhakhtarka bukaanka, ay bixinta macluumaadku ay si caqli-gal ah suurtoagal uga dhigi karto inu macluumaadkaasi halis galiyo nafta ama ammaanka jidh ahaaneed ee bukaanka ama qof kale.

Haddii codsigaaga la diido, waxa aanu kuu soo diri doonaa diidmada oo qoraal ah. Waxa kale oo warqadda diidmada laguugu sheegi doonaa sababta

diidmada keentay iyo wixii xuquuq ad leedahay ee ku saabsan dib-u-fiirin lagu sameeyo diidmada.

**Ku-daris.** Waxa ad naga codsan kartaa in wax laga beddelo macluumaadka caafimaadka qaarkii. Waxa loo baahan yahay in codsigaasi noqdo mid qoraal ah. Waa inad sharaxdid sababta ad u rabtid in macluumaadka wax laga beddelo. Haddii aanu oggalaano beddelidda, waxa aanu isku dayi doonaa in la wargaliyo ciddii hore u heshay macluumaadka (oo ay ku jiraan dadka ad ku soo sheegtid qoraal) si loogu sheego macluumaadka la beddelay. Wixii la beddelay waxa aanu ku soo dari doona macluumaadka caafimaadkaaga ee wakhtiga soo socda la bixin doono. Haddii codsigaaga la diido, diidmada oo qoraal ah ayaaanu kuu soo diri doonaa. Warqadda diidmada waxa ku jiri doona sababta diidmada keentay, waxana lagu sheegi doonaa wixii talaabo jawaab-celin ah ee ad qaadi kartid.

**Liiska Bixinta.** Waxa ad heli kartaa liis u ku qoran yahay ciddii la siiyay macluumaadka caafimaadkaaga - oo leh dhawr ka-reebis - kaasoo annagu aanu bixinay ama cid aanu shuraako nahay bixisay. Liiska kuma jiraan:

- bixin loo sameeyay sababo daweyn, lacag-bixin ama hawl gal daryeel caafimaad (godobkan waxa lagu qeexay qaybta soo socota), iyo
- bixino kale hadba sida sharcigu oggalaaday.

Waa inad codsigaaga ka soo dhigtid qoraal. Waa in codsigaagu sheego muddo wakhti oo gadaal ahaan aan dhaafsanayn lix (6) sanno. Haddii ad soo codsatid liiska macluumaadka la bixiyay in ka badan hal mar muddo ah 12 bilood, waxa dhici karta in aanu kugu soo dalacno kharash la saaro halkii liis ee dheeraad ah. Codsigaaga waad ka noqon kartaa ama wax baad ka beddeli kartaa si kharashku kaaga yaraado ama u baaba'o.

**Ogeysiiska oo ah Koobi Waraaq ah.** Koobi waraaq ah oo ah ogeysiiskan ayaa lagu siin doonaa haddii ad codsatid xiitaa haddii ad hore u oggolaatay inad ogeysiiskan u heshid hab ah elegtaroonig.

### Isticmaalka iyo Bixinta Macluumaadka Caafimaadka

Si lagu siiyo daryeelka ugu tayo fiican, waxa aanu u baahan nahay in aanu isticmaalno oo bixino macluumaadka caafimaadka. Waa aanu ilaalinaa macluumaadka caafimaadka mar kasta oo aanu isticmaalaynayo ama la bixinayno. Waxa aanu raacnaa Ogeysiiskan Habdhaqannada Asturnaanta iyo sharciga marka oo aanu isticmaalno oo bixino macluumaadka caafimaadka. Waxa aanu u isticmaali karnaa una bixin karnaa macluumaadka caafimaadka sidan soo socota:

#### **Hawlaha Daweynta, bixinta kharashka iyo Daryeelka**

**Caafimaadka.** Waxa aanu macluumaadka caafimaadka u isticmaali karnaa una bixin karnaa ulajeedooyinkan:

- Daweyn (waxa ku jira la-shaqeynta daryeel-bixiye kale).
- Kharash bixinta (sida biilasha ka soo baxa adeegyo la bixiyay).
- Hawlgalada daryeelka caafimaadka. Kuwani waa hawlo aan ahayn daweyn iyo kharash bixin oo noo saamaxaya in aanu



shaqadayada qabsano ama bixino adeegyo. Waxa kuwan tusaale u ah qiimeynta tayada iyo hagaajinta, dib-u-fiirinta waxqabadka ama tayada xirfadleyda caafimaadka, iyo bixinta barnaamijyo tababar.

- Hawlgalo daryeel caafimaad oo goob la dabbiro. Waxa kale oo laga yaabaa in aanu macluumaadkaaga caafimaadka siino bixiye daryeel caafimaad oo kale oo ku daweeyay, ama siino shirkaddaada caymiska, haddii macluumaadka noocaa ah loogu baahan yahay hawlgalo daryeel caafimaad qaarkood ee bixiye daryeel caafimaad ama shirkad caymis, sida hawlaha hagaajinta tayada, qiimeynta xirfadleyda daryeelka caafimaadka, iyo hay'adaha heer gobol iyo federal ee maareynta dib-u-fiirinta.

- Bixin la Siiyo Shuraako Ganacsi. Waxa laga yaabaa in aanu qandaraas la galno hay'ado kale si ay adeegyo u bixiyaan iyaga oo wakiil naga ah. Marka ay jiraan xaaladahan, waxa aanu heshiis la gali doonaa hay'adda iyada oo si cad loo sheegayo shuruudaha la xidhiidha ilaalinta, isticmaalka, iyo bixinta macluumaadkaaga caafimaadka ee badbaadsan.

**Degdeg Caafimaad.** Waxa dhici karta in aanu isticmaalo ama bixino macluumaadka caafimaadkaaga si lagu caawiyo marka u jiro degdeg caafimaad.

**Xusuusinta Ballahama iyo Beddelka Daweynta.** Waxa aanu kuu soo diri karnaa xusuusin ballamo, ama kuu sheegi karnaa daweyn iyo faa'iidooyinka caafimaadka ee la xidhiidha ama adeegyo ay dhici karto inad gargaar ka heshid.

**Diiwaanka Macluumaadka Caafimaadka.** Macluumaadkan soo socda waxa aanu siin karnaa qofkii na kaa weydiista ee sheega magacaaga:

- meesha ad ka joogtid cisbitaalka ama goobta
- xaaladda guud
- diinta qofka (waxa la siiyaa kaliya wadaadada).

Waxa ad dooran kartaa in macluumaadkaas qaar ka mid ah ama dhammaantiiba aan la bixin. Tusaale ahaan, haddii aanad doonaynin in aanu dadka u sheegno meesha ad joogtid, waa aanu raaci doonaa amarkaaga. (Marmarka qaarkood, sida marka u jiro degdeg caafimaad, waxa dhici karta in aanaanu helin amarkaaga illaa inta ad ka awoodaysid inad nala hadashid.)

**Dadka Lug ku Leh Daryeelkaaga.** Waxa aanu macluumaad caafimaad oo xad leh siin karnaa dadka lug ku leh daryeelkaaga (tusaale ahaan, qof qoyskaaga ka tirsan ama qof lagala xidhiidho wixii degdeg ah) ama si gargaar looga geysto qorsheynta daryeelkaaga. Haddii aanad doonaynin in macluumaadkaas la bixiyo, waxa ad naga codsan kartaa in aan cidna lala wadaagin. Haddii ay haboon tahay, waxa aanu qof kale u ogalaan karnaa inu kuu soo qaado dawooyinkaaga, alaabta caafimaadka ama raajooyin.

**Hay'adaha Samofalka/Deeq-raadinta.** Waxa dhici karta in aanu kula soo xidhiidhno ama in hay'adahayaga samofalku kaala soo xidhiidhaan barnaamijyo deeq-raadin iyo munaasabado. Waxa kaliya ee aanu isticmaali doonaa ama bixin doonaa magacaaga, si laguula soo xidhiidhi karo, macluumaadka tirokoobka dadka, taariikhaha aanu kuu adeegnay iyo macluumaad kale oo kooban oo ku saabsan daryeelkaaga iyo adeegyada ad heshay. Waxa aanu macluumaadkaas siin karnaa shirkadaha naga caawiya barnaamijyadayada deeq-raadinta. Waxa ad xaq u leedahay inad ka baxdid isgaadhsiinta deeq-raadinta.

**Cilmi-baadhis.** Waxa aanu macluumaadka caafimaadkaaga u isticmaali karnaa ama cid kale ula wadaagi karnaa ulajeedooyin ah cilmi- baadhis sida u ogol yahay sharcigu ama haddii ad oggalaansho bixisay. Waxa ad na weydiisan kartaa sida ad ula xidhiidhi kartid cilmi-baadhe la siiyay macluumaadkaaga caafimaadka loona siiyay ujeedooyin cilmi-baadhis iyo taariikhda aanu siinay.

**Geeri; Bixinta Xubin Jidh.** Qaar ka mid ah macluumaadka caafimaadka ee qofka geeriyooday waxa aanu siin karna qofka dad kuugu xiga. Waxa kale oo aanu macluumaadkaas siin karnaa maamulaha hawlaha duugista (aasidda), baadhaha sabab geeri, sarkaal ka tirsan sharci-fulinta ama hay'ad bixin xubin jidh.

**Indho-ku-haynta Caafimaadka Goob Daryeel Caafimaad/Dhauwac/Cudur.** Haddii ad u shaqeysid bixiye daryeel caafimaad, waxa dhici karta in aanu macluumaadka caafimaad cid la wadaagno sida u qabo sharciga gobolka iyo federalka:

- iyadoo ulajeedadu tahay hawlaha indho-ku-haynta caafimaadka goob shaqo, ama
- iyadoo ulajeedadu tahay dhawaac ama xanuun la xidhiidha shaqada.

**Fulinta Sharciga.** Waxa aanu macluumaadka caafimaadka qaarkii siin karnaa hay'adaha fulinta sharciga. Waxay taasi dhici karta:

- marka ilmo la waayay, ama
- marka ay dhici karto in dambi ka dhacay goobtayada, ama
- marka u jiro halis culus oo ku soo fool leh caafimaadka ama ammaanka qof ama dad kale.

**Goob Xabsi ah.** Waxa aanu bixin karnaa macluumaadka caafimaad ee maxbuus ama qof kale oo xidhan iyadoo macluumaadkaas la siinayo hay'ad sharci-fulin ama goob xabsi ah.

**Xumeyn, Dayicid ama Halis-galin.** Waxa aanu bixin karna macluumaadka caafimaadka iyadoo la siinayo macluumaadka maamulka saxda ah marka u jiro xumeyn suurtoagal ah ama dayicid lagu sameeyay ilmo ama waayeel taag-daran. Haddii caafimaadka ama ammaanka qof u halis culus ku jiro, waxa aanu macluumaadka siin karnaa qofkaas ama hay'ad sharci-fulin.

**Xeerka Hay'adda Cuntada iyo Dawooyinka (Food and Drug Administration) (FDA).** Waxa aanu macluumaadka caafimaadka siin karnaa ciddii amar ka haysata Hay'adda Cuntada iyo Dawooyinka (FDA) si loo cabbiro tayada, ammaanka iyo waxqabadka alaabtooda.

**Maamulka Ciidanka/Nabad-sugidda Qaranka.** Waxa aanu siin karnaa macluumaadka caafimaadka dadka amar haysta ee ka socda ciidanka Maraykanka, ciidan shisheeye iyo nabad-sugidda Qaranka Maraynka ama adeegyada badbaadinta.

**Wixii Halis ku Caafimaadka Dadweynaha.** Waxa aanu macluumaadka caafimaadka ee adiga kugu saaban u bixin karnaa ulajeedooyin caafimaad dadweyne, sida:

- sheegista iyo joojinta cudurada (sida kaansarta ama tiibayda/tiibisho), dhaawac ama naafanimo
- sheegista dhacdooyinka nolosha sida dhalasho ama geeri

- sheegista dhacdooyin aan fiicnayn ama ilaalin la xidhiidha cuntada, dawooyinka ama dhibaatooyin ka yimi alaabta caafimaadka
- ogeysiinta dadka la ogeysiinayo alaab cilad yeelatay, hagaajinta ama beddelidda alaabooyin ay isticmaalayaan, ama.

**Hawlaha Kormeer Caafimaad.** Waxa aanu macluumaadka caafimaadka siin karnaa dawladda, hay'adaha liisan bixinta, la-xisaabtanka iyo cadeynta marka hawluhu yihiin kuwo u oggol yahay ama u rabo sharcigu.

**Marka Sharciyo Kale Kalifaan.** Waa aanu isticmaali karnaa ama bixin karnaa macluumaadka caafimaadka haddii sharciyo kale kalifaan. Tusaale ahaan, waxa laga yaabaa in aanu macluumaadka caafimaadka siino:

- Wasaaradda Caafimaadka iyo Adeegyada Bini'aadanka ee Maraykanka (U.S. Department of Health and Human Services) marka u jiro baadhitaan.
- magdhowga shaqaalaha ama fulinta sharciyo u dhigma.
- adeegyada bulshada iyo hay'ado kale ama dadka loo oggol yahay inay helaan macluumaadka ku saabsan dhawaacyada qaarkood ama xaaladaha caafimaad qaarkood iyadoo sababtu tahay adeeg bulsho, caafimaad ama fulin sharci
- waxa la bixin karaa macluumaadka qof aan qaangaadhin ama qof leh mas'uul sharci ama gacan-ku-haye marka ay jirto iska-saarid ilmo uur ku jira oo soo fool leh
- waxa la bixin karaa macluumaadka ilmo aan qaangaadhin oo xor ah ama ilmo aan qaangaadhin oo la siinayo adeegyo qarsoodi ah si loo joojiyo halis culus oo ku soo fool leh caafimaadka qof aan qaangaadhin.

**Macluumaad ku saabsan badbaadin dheeraad ah.** Noocyada macluumaadka caafimaadka qaarkood ayaa laga yaabaa inay leeyihiin badbaadin dheeraad ah oo hoos timaada sharciga federalka ama gobolka. Tusaale ahaan, macluumaadka caafimaad ee ku saabsan natiijooyinka HIV/AIDS iyo baadhitaanada hiddaha ayaa laga yaabaa in siyaabo kala duwan loola dhaqmo marka la fiiriyo sharciyada gobollada qaarkood. Dheeri ahaan, barnaamijyada federalku caawiyo ee isticmaal-xumida aalkoolada iyo daroogada ayaa qabanaya xad-u-yeelis gaar ah oo ku saabsan isticmaalka iyo bixinta macluumaadka aalkolada iyo daroogada. Markii ay khuseyso arrinta, waxay Allina Health u baahan doontaa inay kaa hesho oggolaansho goran ka hor inta aan macluumaadkaas loo sheegin cid kale xaaladaha inta badan.

**Ogeysiis.** Waxa laga naga rabaa in aanu isla markiiba ku ogeysiino xad-gudub lagu sameeyay macluumaadkaaga caafimaadka.

**Nidaam Maxkamadeed.** Waxa aanu macluumaadka caafimaadka bixin karnaa marka la noo keeno amar maxkamadda federalka ka soo baxay, amarro maxkamadeed, amar maxkamad imaansho, ama dukumentii kale oo sharci ah.

**Diiwaanada Caafimaadka ee Hoos Yimaada Sharciga Gobolka.** Sharciga Minnesota guud ahaan wuxu oggolaanshaha bukaanka u rabaa bixinta diiwaano caafimaad oo ay bixinayaan qaybaha Allina Health ee Minnesota iyada oo ujeedadu tahay daweyn, haddii aan macluumaadka la siinayn daryeel-bixiye sababta oo ah daweyn hadda ah, iyada oo oggolaanshuhu aanu suurtoagal ahayn sababta oo ah degdeg caafimaad, ama bixintu u oggol yahay sharciga mooyaane. Bukaanka jooga Wisconsin, natiijooyinka HIV, haddii ay jiraan, waa la bixin karaa

sida u sheegayo sharciga Wisconsin. Liiska ah dadka ama xaaladaha lagu dejiyay sharciga Wisconsin ayaa la heli karaa haddii la weydiisto.

### Iyada oo Adiga Oggolaansho Lagaa Haysto

Waxa aanu isticmaali karnaa ama bixin karnaa macluumaadka caafimaadkaaga kaliya marka lagaa hayo oggolaansho qoran, marka laga reebo sida kor lagu sharaxay. Badi isticmaalada iyo bixinta qoraallada cilaajka maskaxda (oo ah qoraallo gaar ah oo ay bixiyeyaasha daryeelka maskaxdu u sameystaan isticmaalooka marka ay la tacaalayaan bukaan), macluumaadka caafimaadka ee loogu talagalay ujeedooyin suuqgeyn, iyo iibinta macluumaadka caafimaadka waxa loo rabaa oggolaansho qoran. Haddii ad bixisid oggolaansho qoran, dib ayaad uga noqon kartaa wakhtigii ad doontid adiga oo taas qoraal ahaan nagu soo ogeysiinaya. Warqad ad ku soo qori kartid dib-uga-noqoshada oggolaanshahaaga ayaad ka heli kartaa goobta Allina Health ee lagaa siiyay adeegyada, ama adiga oo nala soo xidhiidha. Oggolaanshaha ad bixisay waxa u joogsan doonaa marka aanu helno warqadda ad soo saxeexday ee aanu hirgalino codsigaaga. Hase yeeshee, go'aankaaga inad dib uga noqotid oggolaanshaha ma saameyn doono ama waxba kama qaban karo isticmaalka ama bixinta macluumaadkaaga caafimaadka ee dhacay ka hor inta aanad na soo ogeysiin go'aankaaga, ama wixii ah tallaabooyin ee aan qaadnay iyaga oo ku saleysan oggolaanshahaaga.

### Su'aalo iyo Cabashooyin

Haddii ad su'aalo ka qabtid habdhaqankayaga asturnaanta, ad u haysatid in lagu xadgudbay xuquuqdaada asturnaanta, aanad raalli ka ahayn go'aan laga gaadhay mid aka mid ah xuquuqdaada asturnaanta, waxa ad soo gudbisan kartaa cabasho inta ad Sarkaalka Asturnaanta ee Allina Health ka soo wacdid 612-262-0503 ama inta ad cabasho qoraal ah ku soo hagaajisid adreska soo socda:

Allina Health Privacy Office  
Mail route 10839  
P.O. Box 43  
Minneapolis, MN 55440-0043

Waxa kale oo ad dacwad qoran u diri kartaa Wasaaradda Caafimaadka iyo Adeegyada Bini'aadanka ee Maraykanka - Xafiiska Xuquuqda Madaniga (U.S. Department of Health and Human Services - Office of Civil Rights (OCR)). Waxa aanu ku siin doonaa adreska ad ku soo hagaajin kartid cabasho haddii ad na weydiisatid. Fadlan la soco in aan lagu ciqaabi doonin ama aan lagaa aargoosan doonin sababta oo ah waxa ad xereysatay cabasho.

Wixii ah su'aalo la xidhiidha bixinta macluumaadka, sida kharashka koobiyada iyo bixinta diiwaanada, la xidhiidh qaybta Macluumaadka Caafimaadka/Bixinta Diiwaanada oo lagala hadli karo 612-262-2300.

Haddii ad qabtid wax su'aalo ama walaac ah oo ku saabsan habdhaqankayaga asturnaanta iyo gaar ahaan ogeysiiskan, fadlan Xafiiska Asturnaanta ee Allina Health ka wac 612-262-0503.

### Hay'adaha u Khuseeyo Ogeysiiskani

Ogeysiiskani waxa u khuseeyaa habdhaqannada asturnaanta ee ay ku dhaqmaan Cisbitaalada iyo Kiliinigyada Allina (Allina Health) ee hoos ku qoran, iyo goobaha ku xidhiidhsan. Goobahaasi waxa laga yaabaa inay ka tirsan yihiin Nidaam Daryeel Caafimaad oo Habeysan.

- Abbott Northwestern Hospital (oo u ku jiro WestHealth)
- Emergency Department (Qaybta Degdegga)
- Allina Health
- Allina Health clinics (Xarumo caafimaad)
- Allina Health Emergency Medical Services (Adeegyada Degdegga Caafimaadka)
- Allina Health Home Care Services (Adeegyada Daryeelka Guriga)
- Allina Health Home Oxygen & Medical Equipment (Oksijiinta Guriga iyo Qalab Caafimaad)
- Allina Health Hospice & Palliative Care (Hoy Daryeel iyo Khafiifin)
- Allina Health Laboratory (Shaybaadh)
- Allina Health Pharmacy (Farmasiga)
- Allina Health Surgical Specialists (Takhasusleyaal Qallitaan)
- Buffalo Hospital
- Cambridge Medical Center
- Courage Kenny Rehabilitation Institute (Machadka Dib-u-hawlgalinta)
- District One Hospital
- John Nasseff Neuroscience Specialty Clinic (Takhasuska Cilmiga Maskaxda)
- Mercy Hospital
- Mercy Hospital - Unity Campus
- Metropolitan Heart & Vascular Institute (Machadka Wadnaha iyo Xididada)
- Minneapolis Heart Institute (Machadka Wadnaha)
- Minnesota Perinatal Physicians (Dhakhaatiirta Dhalashada Ka-hor)
- New Ulm Medical Center
- Orthopaedic Institute Surgery Center (Machadka Lafaha Xarunta Qallitaanka)
- Owatonna Hospital
- Penny George Institute for Health & Healing (Machadka Caafimaadka iyo Bogsashada)
- Phillips Eye Institute (Machadka Indhaha)
- Regina Hospital
- River Falls Area Hospital
- St. Francis Regional Medical Center
- Sports and Orthopaedic Specialists (Takhasusleyaasha Isboortiga iyo Lafaha)
- United Heart & Vascular Clinic (Xarunta Wadnaha iyo Xididada)

- United Hospital
- Virginia Piper Cancer Institute (Machadka Kaansarta)

Shaqaalaha Caafimaadka iyo Daryeel-bixiyeyaasha madax-banaan ee adeegyo ka bixiya mid ka mid ah hay'adaha ku jira liiskan.

Barnaamijyada takhasus leh iyo adeegyada ay bixiyaan mid ka mid ah hay'adaha ku jira liiskan.

Daryeeleyaasha ka qaybgala daryeelka caafimaad ee abaabulan ee Allina Health.

\*Waxa laga yaabaa in liiskani is beddelo hadba muddo ka dib, sababta oo ah hay'adayada oo is beddelaysa oo koraysa.

Taariikh Hirgalid: 14-ka Bisha Afraad 2003

Naqtiinkii Ugu Dambeeyay: 8-dii Bisha Sagaalaad 2017

**Allina Health** 



This package contains important information about your rights as a patient. Please read the attached:

- Minnesota Patients' Bill of Rights
- Rights Under Federal Law

Patients are encouraged to contact the hospital patient representative for any concerns about patient care, service or safety that have not been resolved. Patients have the right for follow-up by the hospital on any complaint. A written or verbal grievance related to the Patients' Bill of Rights or to any other concerns may be resolved by contacting:

Abbott Northwestern Hospital Patient Representative  
800 East 28th Street  
Minneapolis, MN 55407  
Tel: (612) 863-5391 (metro)  
(877) 618-2203

(In the absence of the patient representative, you may ask staff for assistance in contacting the administrative representative.)

OR

Inquiries or complaints regarding care and safety may be directed to:

Office of Quality Monitoring  
Joint Commission on Accreditation of Healthcare Organizations  
One Renaissance Boulevard  
Oakbrook Terrace, IL 60181  
Tel: (800) 994-6610  
E-mail: [complaint@jcaho.org](mailto:complaint@jcaho.org)

Inquiries or complaints regarding medical treatment or the Patients' Bill of Rights may be directed to:

Office of Health Facility Complaints  
P.O. Box 64970  
St. Paul, MN 55164-0970  
Tel: (651) 201-4201  
(800) 369-7994

